XUQUUQDA AADAMIGA IYO HAWEENEYDA UURKA LEH EE ONTARIO

Sharciga Xuquuqda Aadamiga Ontario wuxuu mamnuucayaa in haweeney loo xaqiro iney uur leedahay awgeed, inay cunug dhashay ama ay uur leedahay awgeed. Xuquuqda aadamiga qofka waa mid la rabo in la badbaadiyo marka la joogo goobaha shaqada, xarumaha adeegyada kala duwan iyo guryahaba.

GOOBTA SHAQADA

Kullanada Shaqo-qorista

Waa mamnuuc, marka aad kullanka wareysiga shaqo-qoris ku jirto, in shaqo-bixiyahu ku weydiiyo su'aasha ah "Uur miyaad leedahay?", "Ma xaas baad tahay?" ama "Miyaad ku talo jirtaa inaad guursato?"

Goobta Shaqada

Waa sharcidarro in laguu ruqseeyo uur aad leedahay awgeed, ama in darajo lagaaga dhimo, amaba shaqada lagaaga joojiyo sababtaasi awgeed (xitaa haddii digniin hore laguu siiyay).

Waxaad xaq u leedahay in si caadil ah laguula dhaqmo goobta shaqada marka aad uur leedahay ood sii heysato shaqadaada, aana marnaba lagu duudsiin dallacaad, tababarrada, qabashada mashaariicda adag, ama in aad dib ugu soo laabato shaqadaada markaad umusho kadib.

Baahidaada Gaarka ah

Waxaa suurowda inaad baahi kuu gaar ah qabto marka aad uur yeelato, muddada aad xaamilda tahay iyo marka aad umoshoba. Shaqo-bixiyaha waxaa ku waajib ah inuu caawino dumarka xaamilada ah oo qaba baahida qaaska ah ee u baahan in la siiyo "tixgelin" gaar ah.

Shaqo-bixiyahu, isagoo tixgelin gaar ah u yeelano caafimaadkaada, waa inuu wax ka beddelo howsha aad fulineyso iyo qaabka aad u shaqayneysoba, siiba saacadaha kaltanka shaqo-maalmeedka, saacadaha hakashada iyo fasaxyada gaarka ah ood u baahan tahay inaad dhakhtar aado. Shaqo-bixiyahu wuxuu ku weydiin karayaa inaad la timaado waraaqo cadeyn oo ka marag-furaya inaad caafimaad awgeed u baahan tahay in isbeddel lagu sameeyo qorshahaada shaqo-maalmeedka ah.

Sharcigu wuxuu farayaa in shaqo-bixiyuhu laga rabo inuu si cad u muujiyo in "dhibaato xad-dhaaf ah" la kulmayo hasddii uu tixgeliyo baahida qaaska ee qofka uurka leh.Taasi, waxey micnaheedu tahay, in shaqo-bixiyuhu uu si cad ah u muujiyaa in fulinta howsha ay halis uga iman karto caafimaad qofka xaamilda ah, ama uu cadeeyaa in kharashka ku baxayo tixgelinta baahida qaaska ah ee qofka xaamilada ah ay caqabad ku tahay maamulka sharikada.

Qofka xaamilha ah waxaa kaloo si toos ah u saameynaya Sharciga Heer-dhaqanka Shaqaalaha, kaasoo siinayo 17 asbuuc oo **Fasaxa Umul-baxa ah** oo kaddib wehliya 35 asbuuc oo Fasaxa Waalidnimada ah. Haddii uusan hore u qaadan Fasaxa Umul-baxa ah, tirada Fasaxa Waalidnimada waxay noqoneysaa 37 asbuuc. Shaqo-bixiyuhu kuuma tilmaami karo marka aad bilaabeyso Fasaxa Umul-baxa ah. Marba haddii uu caafimaadkaadu wanaagsan yahay, waxaad sii shaqeyn kareysaa ilaa uu cunuga aad ka umusho, waxaase shardi ah in shaqo-bixiyuhu uu weli sii raali gelin kara baahidaada qaaska ah.

Waxii xog-faahfaahin ah ee ku saabsan fasaxya qofka uuka leh iyo Sharciga Heer-dhaqanka Shaqaalaha kala la xiriiri **Waaxda Heer-dhaqanka Shaqaalaha** ee Wasaaradda Shaqaalaha, ama toos u wac telefoonka guud oo lacag la'aanta ah oo lambarkiisu yahay 1-800-531-5551. Wixii la xiriira Fasaxa Umul-baxa ah kala xiriir **Xafiiska Horumarinta Shaqaalaha ee Kanada**, ama wac lambarka ah 1-800-277-9914 oo adeegyada luqadda Ingriiska ah.

ADEEGYADA IYO HEY'ADAHA

Waxaad xaq u leedahay inaad si xur ah oo xaqiraad ka maran aad u isticmaasho adeegyada kala duwan – sida makhaaxiyada, dukaanada iyo goobaha dadweynaha, sida suuq-weynta iyo jardiinooyinka lagu nasto. Waxaad kaloo leedahay xuquuqda naagta umusha ah. Mathalan, waxaad xaq u leedahay inaad cunugaada ku naasnuujiso goobaha dadweynaha. Cidna kuguma qasbi karto inaad cunugaada ku naasnuujiso meel kale oo "qarsoon". Waa arrin Sharciga qilaafsan in laguu diido ama laguugu cadaadiyo in aad meel la gasho gaari-riixa cunugga.

GURIYEEN

Waxaad xaq u leedahay inaad si aan xaqiraad ku jirin aad u ijaaran karto qolalka guri-dabaq ah, ama aad saxiixi karto waraaqaha ijaarka iyo kunturaadyadaba. Waa sharcidarro in qof loogu diido inuu qol ama dabaq ijaarto iyadoo lagu xigleynayo inay tahay xaamilo, ama ay cunug umushay, ama laga yaabo iney uur yeelato. Waa shacidarro in "Dadka Waaweyn oo keliya" guryo (si gaar ah loogu qoondeeyo). Sidoo kale, waa shacidarro in marka uu cunug kuu dhasho in milkiilaha guriga kugu haddado in "shanqarta" cunugga awgeed guriga lagaaga saari doono. Haddii arrintaasi dhacdo, waa mid xaqiraad ah oo qilaafsan nidaamka qoyska iyo sharcigaba, Waa caadi in sharqan lagala kulmo qoys caruur yar-yar ah sita, waxaase lama huraan ah in qoyskaasi uu inta suurtagalka ah ku dadaalo sidii loo yareen lahaan waxyeelada ay deriska ku yeelan karto.

BADBAADINTA XUQUUQDAADA

Haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada meel looga dhacay, waxaad arji dacwad ah u qori kareysaa Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga Ontario.

XEREYNTA ARJIGA DACWADA

Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga Ontario waxey qaabilsan tahay qaadista dacwooyinka xaqiraadda oo oogideeda loo cuskaday Sharciga Xuquuqda Aadamiga. Maxkamaddu waxey qaadista dacwooyinkeeda ay istacmaaleysaa qaabka dhexdhexaadinta ama garqaadista. La soo xiriir Maxkamadda haddii aad dooneyso:

- Waraaqaha dacwad oogista xaqiraadda
- Tilmaamaha buuxbuuxinta arjiga la xiriira xaqiraadda aad la kullantay.
- Xog ku saabsan qaabka meel-marinta Dacwooyinka xaqiraadda.

Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga Ontario
655 Bay Street, dabaqa 14aad
Toronto, ON M7A 2A3
Telefoonka Magaalada Gudaheeda ah: (416) 326-1312 Telefoonka Lacag La'aanta ah: 1-866-598-0322
Telefoonka Dhagoolka (Magaalada Gudaheeda): (416) 326-2027 Telefoonka Dhagoolka (Lacag La'aanta ah): 1-866-607-1240 Fakiska: (416) 326-2199 Fakiska (Lacag La'aanta ah): 1-866-355-6099
www.hrto.ca

GARGAAR HELIDDA

Haddii aad la kullantay fal xaqiraad ah una baahan tahay talooyin sharciyeed si aad u dhmestirto buux-buuxinta dacwada ku socota Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga Ontario ama aad rabto inaad xalliso arrin la xiriirta Sharciga Xuquuqda Aadamiga, kala soo xiriir cinwankan.

Xarunta Dhexe ee Xuquuqda Aadamiga
400 University Avenue, dabaqa 7aad
Toronto, Ontario M7A 1X8
Telefoonka: (416) 314-6266 Telefoonka Lacag La'aanta ah: 1-866—625-5179
Telefoonka Dhagoolka: (416) 314-6651 Telefoonka Dhagoolka Lacag La'aanta ah: 1-866 612-8627
www.hrlsc.on.ca

Haddii aad dooneyso in kullan gaar oo shaqsi ah lagula yeesho, waxaad nagala soo xiriireysaa lambaka telefoonka kor ku xusan. Hadii aad meel ka baxsan Magaalo Weynta Toronto deggan tahay, nasoo wac si aan uga tashano sida ugu haboon oon kuu baahi tiri karno. Waxaan ku dadaaleynaa in sida ugu haboon aan isla jaliyaddada kuugu soo gaarsiino adeegga aad u baahan tahay. Waxaan adeegeena ku bixinaa 140 luqadood.

XOG DHEERAAD AH

Guddiga Xuquuqda Aadamiga Ontario wuxuu hayaa macluumaad guud oo ku saabsan Sharciga Xuquuqda Aadamiga. Gaar ahaan, wixii macluumaad ah ee ku saabsan Uurka iyo Naas-nuujinta iyo dokumentooyinka la xiriira Axwaasha Qoyska ka eego Bogga Internedka www.ohrc.on.ca

Guddiga Xuquuqda Aadamiga Ontario
180 Dundas Street W., dabaqa 7aad
Toronto, ON M7A 2R9
Telefoonka magaaladal: (416) 326-9511
Telefoonka Lacag La'aanta: 1-800-387-9080
Telefoonka Dhagoolka (Magaalada Gudaheeda): (416) 314-6526
Telefoonka Dhagoolka (Lacag La'aanta): 1-800-308-5561

Dokumentigan waxaa sameeysay Xarunta Dhexe ee Xuquuqda Aadamiga iyadoo ka kaashaneysa heyaadda Iskaashiga Dhaqan-wadaagga Caafimaadka & Adeegga Beesha (2009).

Xarunta Dhexe ee
Xuquuqda Aadamiga

Access Alliance
Multicultural Health and Community Services